# Gagaarida Nolosha iyo Guryaha Haynta

Assisted Living and Nursing Home Laws in Minnesota

## Ma jiraa faraq u dhaxeeya Goobaha Nolol ka gargaarida iyo Guryaha Haynta?

Goobaha Nolol ka Gargaarida iyo Guryaha Hayntu waxa ay u ekaan runtii kuwo isku mid ah. Warqadan xogta aruursan ahi waxa ay ka hadashaa qaar faraqyo ah oo u dhaxeeya iyaga. Wac Minnesota Aging Pathways (laga bedelay Senior LinkAge Line) ee ah 1-800-333-2433 si aad uga hesho akhbaar ku saabsan daryeelada rugta iyo waxa kuu roon adiga.

## - Gargaarida Nolosha -

## Goobaha Gargaarida Noloshu maxay fidiyaan?

Nolol ka gargaaridu waxay fidisaa guryo iyo adeegyo kale sida cunto maalin walba ah, ka caawin dawooyinka, nadiifin guriga ah, ka caawin ah nolol maalmeedka, xarakaad faakihaysi ah iyo adeegyo wicid gargaar degdeg ah.

Goobaha Gargaarida nolosha waxaa ku jiri kara:

- Goobo guryo tas'hiilaad leh ah
- Guryaha dadka hawlgabka ah
- Daryeelada xusuusta iyo daryeelada naf ka dhowka
- Guryo kali kali loogu nool yahay lehna adeegyo



## Siddee ayaan u bixiyaa kharashka Nolol ka Gargaaridda?

Celcelis ahaan kharasha ku baxa Goobaha Gargaarida Noloshu waa qiyaastii $5,500 bishii laakiin kharashku intaa waa ka badnaan karaa ama waa ka yaraan karaa.

## Waxyaabaha aad ka fakari hadii aad Raadinayso Goob Gargaarid Nolosha leh

- Dhamaan goobaha gargaarida oo dhami ma qaataan lacagta barnaamijyada dowlada. Hubi inaad eegto arrintaa.

- Hadii aad doonayso in dowladdu ay kaa bixiso kharashkaaga goobaha gargaarida nolosha waa inaad dirsataa codsiga Gargaarka Caafimaad (MA) ee mudadda dheer ah IYO Qiimeynta Xulashoodyinka MN (MN Choices).

- Waxaa dhici karta inaad adigu jeebkaaha ka bixiso kharashyada guri ku daryeelida inta laga ansaxinayo codsiga (MA). Taasi waxa ay qaadan kartaa asbuucyo ama xataa bilooyin. Tani waxa ay inta badan qaadataa bilo.

- Barnaamijka (MA) waxa uu bixin karaa adeegyada aad u baahan tahay, laakiin waxa aad u baahan tahay inaad bixiso kirada iyo kharashka cuntada. Dadka qaarkii waxaa dhici karta inay caawimaad ka helaan barnaamij gobolku leeyahay oo la yiraa Gargaarka Guryaha. Si aad u isticmaasho Gargaarka Guryaha, baahidaada Gargaarida Noloshu waa inay kharashka kirada iyo cuntada ay ka hoos marisaa $1192-bishii.

- Kaarka MA waxa uu leeyahay xad hantidda iyo dakhliga ah. Haddii aad leedahay hanti badan ama dakhli sare, waxa laga yaabaa inaad u baahato inaad la hadasho qareen ka shaqeeya qorsheynta kaarka MA. Qareenku waxa uu kaala hadli karaa sidda ugu fiican ee aad ugu isticmaali karto dakhligaaga iyo hantidaadda hadafyadaadda.



## Sidee ayaan u doortaa Goob Gargaarida Nolosha ah?

- Ka fakar nooca ay yihiin adeegyada aad rabtaa iyo meesha aad doonayso inaad ku noolaato.

- Hadii aad awoodo, waydii dadka hadda meesha ku nool ra'yigooda goobta

- [https://mn.gov/adresources/](https://mn.gov/adresources/) waa ilo wanaagsan oo laga heli karo akhbaar u saabsan Goobaha Gargaarida Nolosha ee Minnesota iyo ka badan.

## Waa maxay xaquuqdayda Deganaha Goobta Gargaarida Noloshu?

Waxa aad leedahay xaquuq buuxa sida uu dhigayo sharcigu. Waxaana ku jira kuwaa:

- xaquuqaha caadiga ah ee kiraystaha – ka eeg buugayaga yar ee gacanta *Xuquuqda Dadka Guryaha Kireysta Ee Minnesota*
- xaqqa aad u leedahay inaad hesho daryeel iyo adeegyo quman iyo ka qaygal qorsheyntaa
- xaqqa aad u leedahay in si xumad iyo xaq dhowr ah laguula dhaqmo
- inaad xor ka noqoto silcin ama tacadi

- xaqqa ah inaad adigu doorato waxa aad u doonayso naftaada
- xaqqa aad u leedahay xog-xadida ah in qoraaladaada shakhsiyanka ah iyo kuwa caafimaadaba in la xafido

- xaqqa aad u leedahay inaad ka hesho booqashooyin ay ku soo booqdaan ehelkaagu ayna la kulmaan qareenada iyo daryeel-bixiyeyaasha kale

- xaqqa aad u leedahay inaad doorato qofka qolka kula dagi haddii aad cid qol wadaagaysaan

Eeg warqadayada xogta aruursan ah *Xaquuqda ka Gargaarida Nolosha*. Qaar ka mid ah xaquuqda waaweyni ee sharcigu dhigyo waa:

- Ka hor inta aadan u soo guurin rug Nolol ka caawin, waa khasab inuu jiro qandaraas. Qandaraaskuna waa inuu dhigaa wax walba oo aad ogolaatay oo ku saabsan deegaanka iyo adeeyada iyo inta kharashkoodu yahay. Adiga iyo rugtu waa in aad saxiixdaan qandaraaska.

- Kolka aad saxiixo qandaraaska, waa inaad magacowdo "wakiil cayiman." Qofkani waxa uu kaa caawin helida ogaysiisyada waxyaabaha ku saameyn kara, waxa uuna ka hadli maslaxadaada haddii loo baaho. Magacow qof aad ku kalsoon tahay.

- Waxaad xaq u leedahay inaad ka cabato deegaankaaga iyo adeegyada. Waxaad xaq u leedahay inaad ogaato cidda shaqaalaha rugta ah ee aad u jeedsan karto cabashada. Waa inaad ku hesho jawaab-celin muddo macquul ah gudaheed.

**Ka waran haddii aanan ku faraxsanayn goobta iminka ee ka Gargaaridda Nolosha?**
Hadii aad u baahan tahay inaad ashtakooto:

- La hadal rugtaada ka gargaarka nolosha/guryaha haynta. Waxaa dhici karta inaad awoodo in aad dhamaystaan wixii jira waxna laga qabto wixii dhib ah.

- Ka wac khadka wakiilka dadweynaha ee MN (MN Ombudsman) ee Rugaha Dadka Lagu Hayo Mudadda Dheer Khadka ah 651-431-2555.

- Ka wac Xafiiska Ashtakooyinka Rugaha Daryeelka Caafimaad ee MN khadka ah 651-201-4201.

- 

- Ka wac Mid-Minnesota Legal Aid khadka ah 612-334-5970 ee Degmadda Hennepin (Hennepin County) ama khadka bilaashka ah ee 1-877-696-6529.

## Xaquuqaha iyo Ilaalinada kale



- Rugaha Nolol Gargaaridu waa khasab inay shati leeyihiin. Kuwaa waxaa ku jira kuwa fidiya daryeelada xusuusta ama kuwa dakhaakhulka. Wayii taa Waaxa Caafimaadka ee Minnesota (Minnesota Department of Health) si aad u hubiso in goobta aad ka fakaraysaa ay sharciyeysan tahay. Ka wac khadka 651-201-4200 ama emayl ugu dir ciwaanka health.assistedliving@state.mn.us.

- Kaliya waxa ay joojin karaan qandaraaskaaga ayna kaa codsan karaa inaad ka tagto sababo dhowr ah oo mucayin ah awgood, sida:

  - bixin la'aanta kharashka bilaha ah
  - in aad jabiso waxa lagu heshiiyey ee qandaraaska ku qoran
  - inaysan ku daryeelayn mar dambe sababtoo ah isbedel ku yimid xaaladaada caafimaad ama fal
  - habdhaqankaagu uu farageliyo xaquuqda, amaanka ama caafimaadka dadka kale ee degan rugta ama shaqaalaha

- Waxa aad xaq u leedahay inaad racfaan ka qaadato joojin qandaraas. Waxa aad racfaanka u qaadan kartaa xaakim maamulka sharciga qaabilsan oo ka tirsan Xafiiska Maamulka Dhageysiyada Dacwooyinka ee Minnesota. Waxa aad racfaan ka qaadan kartaa waxyaabaha sida:

  - hadii ay jirto su'aal ah in joojinta qandaraasku ay sharci tahay iyo kale
  - aad is leedahay waxa ay jabiyeen sharciga
  - aad saxi karto waxa ay doonayaan inay awgii qandaraaskaaga u joojiyaan


- aadan ku raacsanayn inaysan mar dambe ku daryeel  karin adiga

- aadan ku raacsanayn in habdhaqankaagu uu farageliyo xaquuqaha, amaanka ama caafimaadka dadka kale

- joojinta qandaraasku oo ku gelin karta khatar waxyeelo oo ku soo gaarta

- Hadii rugta Gargaarida Noloshu ay doonayso inay joojiso adeegyada ay kuu fidiso adiga wali waa aad sii joogi kartaa degaanka hadii aad kala timaado adeegyo aad adigu leedahay dibada aadka kharashkooda la baxayso.

- Haddii aad guuro, waa inay kaa caawiyaan inaad meel kale ku wareegto. Kuuma rari karaan meel aan amaan ahayn ama aan ku siin karin adeegyada aad u baahan tahay.



- Haddii qofka qolka kula degani uu ogolaado, waa aad gelin kartaa kaamaro qolkaaga si aad u ilaaliso amaankaaga. Waa khasab inaad siiso Rugta Gargaarka Nolosha foom saxiixan haddii aad rabto kaamaro.

  Waxa aad ka heli kartaa foomamka barta:

  health.state.mn.us/facilities/regulation/emonitoring/. Shabakada boggani waxa ay haysaa akhbaar iyo mareeygo (link) ku xiran foomam kala duwan oo ku saabsan xaalado kala duwan.

- Haddii adiga ama cid kale kale oo adiga maslaxaadda ka shaqeeynaysaa
  - ay ashtakoodo,
  - ay xareeyso warbixin silcin ah, ama
  - ay u istaago xaquuqdaadda

  goobta nolol ka gargaarka iyo/ama shaqaalaheedu kuguma colaadin karaan arintaa.

- Waxa aad xaq u leedahay inaad ku esho akhbaarta sida ugu fiican ee aad ku fahami karto. Taasi waxaa dhici karta inay noqoto afka kale, oo ay ku jiraan afka farta indhoolayaasha ama afka dhagoolayaasha (ASL).

# - Guryaha Haynta -

## Guryaha Hayntu waa ay ka duwan yihiin Goobaha Nolol Gargaarida

Guryaha Hayntu waxa ay leeyihiin sharciyo dheeraad ah iyo ilaalino u gaar ah. Medicare waxaa dhici karta inay bixiso qayb ka mid ah kharashka haynta.

Gargaarada Caafimaad (MA) waxa ay iyana bixin karaan kharashaadka Guryaha Haynta.

## Waa maxay xaquuqa aan leeyahay ee deganaha guriyaha haynta ah?

Waxa aad leedahay xaquuqda joogtada ah ee kiraystaha. Waxa aad leedahay qaar badan oo isla xaquuqahaas kor ku xusan ah oo ku saabsan Gargaarida Nolosha. Waxaad kaloo leedahay ilaalino kale oo dheeraad ah.

Waxaa jira 6 sababtood uun oo lagaaga eryi karo Guryaha Haynta:

1) Xaaladaadda caafimaad oo hagaagta
2) Rugta oo la xiro
3) In kiro lagugu leeyahay
4) Inaadan amaan ku sugnayn
5) Cid kale aysan amaan ahayn hadii adiga meesha aad joogto
6) Rugtu aysan ka soo bixi karin baahidaada

Waa muhiim in Rugta Hayntu ay qaado talaabooyinka saxda ah ka hor inta aysan go'aansan in lagu eryo, sidda:

1) In la ogaysiiyo adiga, wakiiladaadda, sidda Wakiilka dadweynaha (Ombudsman), sababaha eryidda
    - Waa inay noqotaa sababtu qoraal
    - Waa in loo qoraa qaab aad fahamto
    - Waxaad u baahan tahay in lagu siiyo ugu yaraan 30 cisho ka hor maalinta meesha kuugu dambaysa

2) Waa in lagu qoro sababaha eryidda diiwaanadaadda caafimaadka

Lagu ogaysiiyo rugta haynta ah ee cusub laguuna sameeyo wacyi-gelin

Waxaa jirta Xaquuq Gargaarida Nolosha ah (Health Care Bill of Rights) oo sharciga Minnesota dhigayo. Waxa uuna kaa ilaalin adiga sharcigaasi in lagugu khasbo inaad qaadato dawo ama daryeelo aad diidan tahay.

## Si aad uga ashtakooto rugaha Gargaarida Nolosha ama Guryaha Haynta:

- La hadal rugtaada daryeel. Waxaa dhici karta inaad awoodaan inaad xalisaan wixii khilaafaad ah oo jira.
- Wac Wakiilka Dadweynaha ee Daryeelada Mudadda Dheer ah ee MN
  1-800-657-3591
- Wac Xafiiska MN ee Ashtakooyinka Rugaha Caafimaadka
  1-800-369-7994

## Wixii caawimaad ah ama akhbaar kale

Wac khadka Xiriirinta Waayeelka (Senior Linkage Line) ee ah 1-800-333-2433

*Warqadan xogta aruursan waxaa maalgeliyey qayb ahaan hay'yada agagaarka Trellis iyo Older Americans Act.*

***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2026 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**